Akhriska, Qoraalka iyo Tirada
**Warqadda Macluumaadka**
Taageerida ilmahaaga

# Waa maxay **akhriska iyo qoraalku?**

**Akhriska iyo qoraalka waa kartida lagu akhriyo, lagu arko, qoro, nashaqdeeyo, lagu hadlo oo lagu dhegaysto qaab noo saamaxa inaan u wada xidhiidhno si waxtarleh oo macno u samaysa adduunka.**

## Maxay muhiim u tahay akhriska iyo qoraalku?

Akhriska iyo qoraalku waxay muhiim u tahay hubinta in ilmahaagu haysto fursada ugu fiican ee ay ugu guulaystaan waxbarashadooda iyo nolosha maalin kasta. Akhriska iyo qoraalku waxay noo saamaxdaa inaan macno usamayno qoraalo kala duwan oo qoran, la akri karo oo lagu hadlo ay ku jiraan buuggaagta, wargeesyada, jariidadaha, jadwalada, DVDy-ada, telefeeshanada iyo barnaamijyada raadiyaha, calaamadaha, khariidadaha, wada sheekaysiuada, iyo tilmaamaha.

## Qaababka lagu taageero koboca wax akhriska ilamahaaga

Cilmi baaris ayaa muujisay in dhiirigelinta carruurta iyo guul gaadhidu ay horumarto marka waalidka ama daryeelaha ay ku lug leeyihiin waxbarashadooda.

Waxaa jira waxyaaba badan oo shayga maalin kasta ah oo aad samayn karto si aad ku dhiirigeliso barashada akhriska iyo qoraalka. Kuwan waxaa ka mid ah:

- Qiimaynta iyo ku dhiirinta ilmahaaga dedaalkiisa akhriska iyo qoraalka
- La wadaagida aqoontaada iyo u sharaxida sida aad u isticmaasho akhriskaha iyo qoraalka noloshaada maalin kasta ah
- Ku dhiirinta ilmahaaga inuu akhriyo oo arko qoraalo kala duwan sida wargeesyada, sheekooyinka, maaddaha qosolka aleh, jariidahaha, websaydyada, iimaylka, jadwalada, tilmaamaha iyo cunto karin.
- ku dhiirinta ilmahaagu inuu wax akhriyo oo nashaqadeeyo ujeedooyinka kala duwan isagoo isticmaalaya daabacaad iyo ilaha korontada --- marti qaadyo, qoraalada mahadnaqa, liiska wax iibsiga, fariimaha, joornaalada iyo boggaga bandhiga korontada ah
- ku dhiirinta ilmahaagu inuu hadlo oo dhegaysto ujeedooyin kala duwan — wadaaga kaftanka, bixinta tilmaamaha ama waydiinta maclumaadka
- wadaaga luqadda jacaylka
- Ka hadalka sida qoraalada ay ukala duwanyihiin iyaddoo ku xidhan ujeedada iyo dhagaystayaasha --- tusaale, fariimo dirista waxay isticmaashaa higaaddo kala duwan oo ka timid mashaariicda dugsiga.
- Ka hadalka wax ku saabsan waxyaabaha aad akhriday ama aragtay ee maada lahaa, xiisaha lahaa ama faa'iidada lahaa
- ka hadalka qoraayada dookha ah, soo saare yaasha ama sawir sameeyayaasha iyo waxa aad jeceshahay ee iyaga ku saabsan.
- ka hadalka kelmaddo cusub oo aan caadi ahayn ama weedho iyo sahaminta kuwan dhexda daabacadada iyo qaamuusyada korontada ah
- ciyaarta ciyaaraha kobcisa aqoonta iyo xiisaynta kelmadaha
- Ka faa'iidaysiga khayraadka bulshadda ee macluumaadka, maktabadaha maxaliga iyo dugsiga, naadiyada, kooxaha bulshadda iyo websaydyada.

Akhriska, Qoraalka iyo Tirada
**Warqadda Macluumaadka**
Taageerida ilmahaaga

# Waa maxay **tiradu?**

**In xisaabta aqoon loo yeesho waa in qarsoodiga iyo si waxtarleh u isticmaalka xisaabta si loo buuxiyo dalabaadka nolosha maalin kasta ah.**

## Sidee ayay aqoon u yeelashada tiradu muhiin u tahay?

Fahamka tiradu waxa uu kaa caawiyaa kobcinta fekerida macquulka ah iyo farsamooyinka sababaynta ah ee noloshaada maalinlaha ah. Waxaanu uga baahanahay tirada si aanu u xalino dhibaatooyinka oo waqtiga macquul aan uga dhigno, tirooyinka, noocyada qaababka hawlaha sida wax karinta, akhriska khariidada ama biilka, akhriska tilmaamaha iyo xataa ciyaarta ciyaaraha.

## Qaababka loo taageero koboca wax tirinta ilmahaaga

Cilmi baadhidu waxay muujisay in dhiirigelinta carruurta iyo guul gaadhida horumarto marka waalidka ama daryeelayaasha ay ku lug leeyihiin waxbarashadooda.

Waxaa jir waxyaaba badan oo shayga maalin kasta ah oo aad samayn karto si aad ku dhiirigeliso barashada tirinta. Kuwan waxaa ka mid ah:

- Dhiirgelinta ilmahaagu inuu isticmaalo luqadda xisaabta --- inta ay leegtahay, sida ay u wayntahay, sida ay u yartahay, inta tiradeedu tahay
- Ka hadalka isticmaalka tirooyinka, noocyada, iyo qaababka noloshaada maalin ilaamaarlin ah ---tirooyinka laga helo buuggagta maktabada, noocyad ameelaha ama qaababka garoomada, guriga iyo dhismaha wayn.
- ka hadalka munaasabadaha marka aad isticmaalayso xisaabta shaqooyinka maalin walba ah iyo xaalada nolosha dhabta ah – wax karinta, akhriska khariidada, dhismaha iyo ciyaarida isboortiga.
- xaaladaha sahaminta ee isticmaalo lacagdukaamaysiga, miisaaniyada iyo kaadhadhka amaahda
- qiyaasta, cabbirida iyo isbarbardhiga dhererka iyo joogaga, culayska inta uu leegyahay ama waxyaabaha fudud iyo inta uu weelku qaado
- ka hadalka qaababka kale ee loo xaliyo dhibaatooyinka
- isticmaalka qalabka maalin kasta ah sida fuudhka qiyaasta ama miisaanada kijada iyo ka hadalka halbeeyada cabbirka
- Waydiinta "taasi macno ma samaysaa?", 'jawaabtu ma macquul baa?' ama 'qaababkee kale ayaan tan u samayn karnaa?'
- Fiirinta iyo isticmaalka jadwalada, jadwalada taariikhda iyo saacadaha ujeedooyinka kala duwan loogu talo galay sida xiisadaha, qorshaynta fasaxa iyo gaadhi gaadiidka dad waynaha.
- Caawinta ilmahaaga inuu qabto inta waxyaabaha qiimahoodu yahay iyo sarifka ay heli doonaan.
- Ciyaarta tirooyinka ciyaaraha iyagoo isticmaalaya jariidahaha, buuggaagta, wargeesyada iyo lambarka baabuurka.
- Abaabulka, qayb u samaynta iyo tirinta xulka waxyaabaha sida caagag carruurta, buuggaagta, dharka iyo kabbaha.

**Wixii macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku caawin karto ilmahaaga akhriska iyo qoraalka iyo tirida booqo www.education.qld.gov.au/parents/map ama la xiriir macalinka canugaaga ama dugsiga.**